



IS-DIYAARINTA KU SALEYSAN MIISAANIYADDA



Is-Diyaarinta ku Saleysan Miisaaniyadda

Qorshe u diyaarso noocyada masiibooyinka dabiiciga ah ee ka dhici kara deegaankaada.

Samayso liiskaaga gaarka ah. Waxaa dhici karta in aadan u baahanin wax kasta oo ku jira agabka “horay loo diyaariyay” waxaana dhici karta in ay jiraan waxyaabo dheeraad ah ood u baahan tahay marka la eego xaaladahaaga gaarka ah. Tusaale ahaan, haddaad leedahay rabbaayado, waxaad u baahan kartaa ashyaa gaar ah. Ha illaawin inaad alaabta ku haysato baabuurkaaga iyo shaqada.

Ka raadi ugu horrayn gurigaaga waxyaabaha aad ku ridi karto agabkaaga adiga oo isticmaala liiskaaga khaaska ah ee aad sameysay. Waxaa dhici karta inaad la yaabto inta shay eed horay guriga ugu haysatay ee u baahan in la isku soo ururiyo oo keliya.

Miisaaniyad u sameyso diyaarinta waxyaabaha degdegga sida “caadi ah”. Xiitaa \$20 bishii ayaa wax wayn qaban karta, kuguna kaalmeyn karta in aad diyaar ahaatid. libso hal shay oo ka tirsan alaabta isu diyaarinta mar kasta aad tagto dukaanka raashinka.

Keydso adiga oo iibsada marka beeca fiican yahay. Isticmaal kooboonada kana iibso dukaamada alaabta kaambka iyo alaabta la isticmaalay. Dukaamada doolarka iyo alaabada la siticmaalay waxay hayaan alaab badan oo loo baahan yahay.

Tijaabi agabkaaga isu-diyaarinta gurmada 6 bilood oo kasta. Beddel oo dib u isticmaal waxyaabaha cimrigoodu kooban yahay (sida, biyaha, cuntada, beetariyada). Waxaad dooni kartaa inaad isla mar tijaabiso raadiyaha iyo tooshka si aad u hubiso inay si fiican u shaqaynayaan. Isticmaal taariikhda Daylight Savings si ay kuu xasuusiyaantaariikhaha tijaabinta is-diyaarinta.

Ku kaydi biyaha weel ammaan ah. Ma aha khasab inaad iibsato biyo badan oo qaali ah sida kuwa ku jiro dhalooyinka laakiin hubso in weelasha aad u isticmaalayso kaydinta biyaha yahiin ammaanlagana dilay jeermiska

Codso ashyaada isu diyaarinta sida in ay yahiin hadyad. Dhammaanteen waxaynu helnaa hadyado aynaan u baahnayn ama isticmaalin. Bal ka waran haddii asxaabtaada iyo xubnaha qoyskaagu ku siiyaan hadiyado badbaadin kara noloshada? Ha illaawin inaad iyaga badbaadisid adiga oo dhankooda sidoo kale u dira hadyadaha is-diyaarinta.

Horay uga fikir. Waxaad u badan tahay in ay kuu baaqato lacag haddii aad waqtigaaga gelin kartid istraatijiyada iyo bartilmaameysiga wax gadashada. Waa marka qof kasta uu joogo dukaanka, inyar ka hor inta aanu duufaanka ku dhufan ee laga yaabo in aad degdeg wax ku iibsato. Isticmaal liis si aad isaga ilaaliso in aadan labo ka iibsanin marka aad walwalsan tahay ama wareer kugu dhaco.

Dib-u-eeg siyaasadda caymiskaaga sannadkiiba mar oo samee isbeddelada lagama maarmaanka ah. Marka ay masiibo dhacdo, waxa aad doonaysaa inaad ogaato in caymiskaagu uu kaa caawin doono inaad cagahaaga dib iskugu taagto. Sidoo kale, kiraystayaashu waxa ay u baahan yihiin ceymis, si ay u caymiyaan hantida shaqsiga.

Casriyeey diiwaanada xidhiidhka. Yeelo liis lambarada tilifoonada xidhiidhka gurmada oo sax ah. Haddii aad diyaar tahay, waxa aad awoodi kartaa inaad caawiso asxaabtaada iyo jaarka kuwaasi oo u baahan kaalmo. Iyada oo la wadaagayo alaabaha isu-diyaarinta, waad is caawi kartaan

Ku baddalo hal habeen si aad u maalgaliso agabka isu-diyaarinta gurmada qoyskaaga. Tusaale ahaan, kharashka ku baxa qoyska ka kooban afar qofood u tagta ashaneemada waxay ku kici kartaa in ka badan \$80-\$100. Hal habeen oo aad iska dhaafto waxay maalgalin kartaa agabka is-diyaarinta gurmada qoyskaaga.

